رئاسة الشؤون الدينية
بالمسجد الحرام والمسجد النبوي

Soomaali | صومالي | كَيْفِيَّةُ صَلاَةِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ

# Qaabka Salaadii Nabiga nabadgelyo iyo naxariisAllaha siiye

Samaaxatu Sheekh
Cabdul Casiis Binu Cabdullaah Binu Baas

# كَيْفِيَّةُ صَلَاةِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ

# Qaabka Salaadii Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiye


لِفَضِيلَةِ الشَّيْخِ العَلَّامَةِ

عَبْدِ العَزِيزِ بْنِ عَبْدِ اللَّهِ بْنِ بَازٍ

غَفَرَ اللَّهُ لَهُ وَلِوَالِدَيْهِ وَلِلْمُسْلِمِينَ

Samaaxatu Sheekh

Cabdul Casiis Binu Cabdullaah Binu Baas

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

# Qaabka Salaadii Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiye

Waxaan ku bilaabayaa Magaca Allaah ee Naxariista guud iyo mida gaarka ahba naxariista.

Mahad oo dhan Ilaahay keligi ayaa leh, naxariis iyo nabad gelyana Ilaahay ha siiyo Adoonkiisa iyo Rasuulkiisa ah Nabigeena Maxamed, iyo Ehelkiisa iyo Asaxaabtiisa, intaa ka dib:

Kuwaani waa kalmado kooban oo cadaynaya Qaabka Salaada Nabiga -nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee-, waxaanan jeclaystay inaan u soo gudbiyo Ragga iyo Dumarka Muslimka ah, si Qofkii akhriya ugu dadaalo inuu ku daydo Nabiga -nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee; waayo wuxuu yiri Nabigu -nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee-:

(صَلُّوا كَمَا رَأَيْتُمُونِي أُصَلِّ).

(U tukada sidaad igu aragteen anigoo u tukanaya)[1]. Akhristahana waxaan u soo gudbinaynaa arinkaa Cadeyntiisa:

1- Waa inuu weysada ku xeel dheeraado, waana

[1] waxa wariyay Bukhaari (nambarka 605)

inuu u weyso qaato siduu Ilaahay amray, isagoo ku Camal falaya hadalkii Ilaahay sareeye yiri:

﴿يَـٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓاْ إِذَا قُمۡتُمۡ إِلَى ٱلصَّلَوٰةِ فَٱغۡسِلُواْ وُجُوهَكُمۡ وَأَيۡدِيَكُمۡ إِلَى ٱلۡمَرَافِقِ وَٱمۡسَحُواْ بِرُءُوسِكُمۡ وَأَرۡجُلَكُمۡ إِلَى ٱلۡكَعۡبَيۡنِ...﴾.

Kuwa Xaqa rumeeyow! Hadaad u kacdaan Salaada mayra wajigiina iyo gacmihiina ilaa xusulada, oo masaxa Madaxyadiina, oo mayra lugahiina ilaa canqawyada... [Suurada Almaa'idah: 6]. Aayada.

Iyo hadalkii Nabigu nabadgelyo iyo naxariis wuu yiri:

(لَا تُقْبَلُ صَلَاةٌ بِغَيْرِ طُهُورٍ).

(Lama aqbalo Salaad daahirnimo la'aan ah)[1]

Iyo hadalkii Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu ku yiri kii Salaadiisa xumeeyey:

(إِذَا قُمْتَ إِلَى الصَّلَاةِ، فَأَسْبِغِ الْوُضُوءَ).

(Markaad u istaagto Salaada, weysada ku xeel dheerow).[2]

2- Qofka tukanayaa wuxuu u jeesanayaa Qiblada, waana Kacbada meel kasta uu joogaba isagoo jirkiisa oo dhan u jeedinaya, qalbigana ka niyeysanaya inuu Salaada doonayo haday faral ama sune tahay.

---

[1] Muslim ayaa ku wariyey, tirada (224).

[2] Bukhaari ayaa ku wariyey, tirada (5782).

Carabkiisana kaga dhawaaqi maayo niyada; waayo Carabka in lagaga dhawaaqo la ma jideyn, balse waa bidco, maadaama Nabigu nabadgelyo naxariis Allaha siiyee uusan niyada ku dhawaaqin, sidoo kalena Asxaabtiisu Ilaahay ha ka raali noqdee aysan ku dhawaaqin. Wuxuu samaysan Sutro uu u tukado haduu Imaam ama keligi yahay. Qiblada in loo jeensado waa shardi ka mid ah shuruuda Salaada, marka laga reebo Masaa'il gaar ah oo la yaqaan oo lagu cadeeyey kutubta Culumada.

3- Wuxuu ku takbiirsan takbiirta ixraamka isagoo dhahaya: Allaahu Akbar, aragiisana ku eegaya meesha uu ku sujuudayo.

4- Gacmahiisa ayuu kor u qaadin markuu takbiirsanayo ilaa meel la siman Garbahiisa ama ku beegan Dhagahiisa.

5- Gacmihiisa wuxuu saarayaa Laabtiisa, Gacanta Midig wuxuu kor saarin Cur-Curka, iyo Dhu-Dhunka Gacantiisa bidix, waayo sidaas ayaa ka sugn Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee.

6- Waxaa Sune ah in la akhriyo ducada istiftaaxa, waana:

(اللَّهُمَّ بَاعِدْ بَيْنِي وبيْنَ خَطَايَايَ، كَمَا بَاعَدْتَ بَيْنَ المَشْرِقِ وَالمَغْرِبِ، اللَّهُمَّ

نَقِّنِي مِنَ الخَطَايَا كَمَا يُنَقَّى الثَّوْبُ الأَبْيَضُ مِنَ الدَّنَسِ، اللَّهُمَّ اغْسِلْ خَطَايَايَ بِالمَاءِ والثَّلْجِ والبَرَدِ).

(Allahayow, kala fogee aniga iyo dambiyadayda, sidaad u kala fogeysey Bari iyo Galbeed, Allahayow iiga nadiifi dambiyadayda sida Marada cad looga nadiifiyo wasakhda, Allahayow igaga dhaq dambiyadayda Biyo, Baraf iyo Biyo qabow)[1].

Haduu doono wuxuu oran taas bedelkeeda:

(سُبْحَانَكَ اللَّهُمَّ وبِحَمْدِكَ، وَتَبَارَكَ اسْمُكَ، وَتَعَالَى جَدُّكَ، ولَا إِلَهَ غَيْرُكَ).

(Allahayow adigaa ka hufan xumaan, amaan oo idil iyo mahadna adigaa leh, Magacaaguna barako badan yahay, sharaftaaduna saraysaa, ma jiro Ilaah xaq lagu caabudo oo aan Adiga ahayn)[2], Haduu la yimaado ducooyin kale oo ka mid ah ducooyinka Salaada lagu bilaabo ee Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka sugan, dhib ah ma leh, sida ugu fadliga badanse waa inuu midba mar la yimaado; waayo taas ayey ku dhan tahay raacida Nabigu. Ka dib wuxuu oran: Ilaahay ayaan ka magan gelayaa sheydaanka la fogeeyey, Bismillaahi Raxmaani Raxiim, wuuna akhrinayaa Suurada Faataxada, waayo Nabigu wuxuu yiri:

(لَا صَلَاةَ لِمَنْ لَمْ يَقْرَأْ بِفَاتِحَةِ الكِتَابِ).

---

1 Bukhaari ayaa ku wariyey, tirada ( 744), iyo Muslim, tirada (598).

2 Muslim ayaa ku wariyey tirada: (399).

(U ma jirto Salaadi Qofkaan ku akhrin Faatixada Kitaabka) [1]. Ka dib wuxuu oran, Aamiin, isagoo codka kor ugu qaadaya Salaada Jahriga ah, oo siraysanaya Salaada Sirta ah. Ka dibna wuxuu akhrinayaa wixii u fududaada ee Qur'aan ah, waxaana ugu fadli badan inuu Faatixada ka dib ku akhriyo Salaadaha Duhurka, Casarka iyo Cishaha Suuradaha dhex dhexaadka ah, Salaada Fajarkana Suuradaha dhaadheer, Maqribkana marna Suuradaha dhaadheer marna Suuradaha Gaagaaban, isagoo ku camal falaya Axaadist ku soo aroortay arrinkaas.

7- Wuu rukuucayaa isaga oo takbiirsanaya, korna u qaadaya Gacmihiisa meel la siman Garbahiisa ama Dhegihiisa, Madaxiisana la simaya Dhabarkiisa, Gacmihiisana saaraya Jilbihiisa isagoo farahiisa fidinaaya. Wuuna ku xasilin rukuuciisa, wuxuuna oran: Subxaana Rabiyal Cadiim. Waxaana fadli badan inuu ku celceliyo seddex jeer ama ka badan, waana Sune inuu intaas ku daro:

(سُبْحَانَكَ اللهُمَّ وَبِحَمْدِكَ، اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِي).

(Ilaahayow adaa xumaan ka hufane, iyo mahad naqaagee, Ilaahayow ii denbi dhaaf)[2].

8- Wuxuu ka soo kacayaa rukuucda, kor buuna u

[1] Bukhaari ayaa ku wariyey, tirada ( 756).

[2] Bukhaari ayaa ku wariyey, tirada( 817) iyo Muslimna, tirada (484).

qaadayaa Gacmihiisa ilaa meel la siman Garbihiisa ama Dhegihiisa, isagoo dhahaya: Samica Allaahu liman Xamidah haduu yahay imaam ama Qof keligi ah, wuxuuna oran markuu taagan yahay:

(رَبَّنَا ولَكَ الحَمْدُ حَمْدًا كَثِيرًا طَيِّبًا مُبَارَكًا فِيهِ مِلْءَ السَّمَواتِ ومِلْءَ الأَرضِ، ومِلْءَ ما شِئتَ مِن شيءٍ بَعدُ).

"Rabanaa walakal xamdu, xamdan kasiiran, dayiban, mubaarakan fiihi, mil'as-samaawaati wa mil'al-ardi, wa mil'a maa shi'ta min shey'in bacdu."

"Rabiyow, adigaa iska leh mahad badan oo wanaagsan oo barakaysan, in dhan muga Samooyinka iyo Dhulka, iyo muga waxaad doonto intaas ka dib."[1]

Haduuse Ma'muum yahay wuxuu oran markuu kor u kacayo: Rabanaa walakal xamdu ilaa dhamaadka wixii horay u soo maray, hadiise labadooda mid walba wax ku daro, waxaan u la jeedaa imaamka, iyo Ma'muumka iyo Qofka keligi tukanaya.

(أَهْلَ الثَّنَاءِ والْمَجْدِ، أَحَقُّ مَا قَالَ العَبْدُ، وَكُلُّنَا لَكَ عَبْدٌ: اللَّهُمَّ لَا مَانِعَ لِمَا أَعْطَيْتَ، ولَا مُعْطِيَ لِمَا مَنَعْتَ، ولَا يَنْفَعُ ذَا الجَدِّ مِنْكَ الجَدُّ).

(Ilaahow Adigaa iska leh amaanta iyo sharafta, waana hadalka ugu xaqsan ee uu Adoonku yiraahdo, dhammaan-na Adoon ayaanu kuu nahay: Allahayow

[1] Bukhaari ayaa ku wariyey, tirada( 711), Muslimna, tirada (598).

ma jiro Qof diidi kara waxaad bixisay, mana jiro Qof bixin kara waxaad diiday, waxna ka ma anfacdo kan deeqda lehi deeqdiisu agtaada)[1]. Xadiisku waa Xasan, waayo arinkaasi wuu ka sugnaaday Nabiga.

Waxaa Sune ah in mid walboo iyaga ka mida waxaan u la jeedaa Imaamka, Ma'muumka iyo kan keligi tukanaya uu Gacmihiisa saaro Laabtiisa, siduu sameeyey markuu taagnaa Rukuuca ka hor, waayo waxaa Nabiga ka sugan wax arintaa tilmaamaya oo ah xadiiskii Waa`il Binu Xujar iyo Sahal Binu Sacad, Ilaahay labadaba ha ka raali noqdee.

9- Wuu Sujuudin isagoo takbiirsanaya, oo dhigaya labadiisa Jilib Gacmihiisa ka hor haday u fududaato, hadiise ay ku adkaato wuxuu ka hor marin Gacmihiisa Jilbihiisa, isagoo u jeedinaya Faraha Cagahiisa iyo kuwa Gacmihiisaba Qiblada, oo isku dhajinaya faraha Gacmihiisa oo fidinaya, wuxuuna ku Sujuudayaa todobadiisa xubnood: Wajiga iyo Sanka, labada Sacab, labada Jilib, iyo Fooda Faraha Cagaha, wuxuuna oran: Subxaana Rabiyal Aclaa, waxaana Sune ah inuu yiraahdo seddex jeer ama ka badan, waana Sune inuu intaa dhoho oo raaciyo:

(سُبْحانَكَ اللَّهُمَّ رَبَّنا وبِحَمْدِكَ، اللَّهُمَّ اغْفِرْ لِي).

---

[1] Muslim ayaa ku wariyey, tirada: (477).

(Subxaanaka Allaahuma Rabanaa Wa bixamdika Allaahuma iqfir lii), Wuuna badinayaa ducada, waayo Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri:

(أَمَّا الرُّكُوعُ، فَعَظِّمُوا فِيهِ الرَّبَّ، وَأَمَّا السُّجُودُ، فَاجْتَهِدُوا فِي الدُّعَاءِ، فَقَمِنٌ أَنْ يُسْتَجَابَ لَكُمْ).

Rukuucda ku weyneeya Rabi, Sujuudana ku dadaala ducada, waayo waxay u dhowdahay in la idinka aqbalee[1].

Rabigina ha waydiisto Khayrka Aduun iyo Aakhiraba, Waa isku mid in Salaadu tahay Faral ama Sune, Cududihiisa wuxuu ka fogeyn dhinacyadiisa, Caloshiisana Bowdooyinkiisa, Bowdooyinkiisana Kubabkiisa, wuxuuna DhuDhumadiisa kor uga qaadin Dhulka, waayo Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri:

(اعْتَدِلُوا فِي السُّجُودِ، ولَا يَبْسُطْ أَحَدُكُمْ ذِرَاعَيْهِ انْبِسَاطَ الكَلْبِ).

(Sujuuda ku toosnaada, oo yuusan midkiin labadiisa Dhudhun Dhulka u dhigin sida Eyga oo kale)[2].

10- Wuxuu kor u qaadin Madaxiisa isagoo takbiirsanaya, wuxuuna firaashin oo ku fariisan

---

[1] Muslim ayaa ku wariyey, tirada: (479).

[2] Bukhaari ayaa ku wariyey, tirada ( 788), iyo Muslim, tirada (493).

Cagtiisa Bidix, wuxuuna taagin Lugtiisa Midig, Gacmihiisana wuxuu kor saarin Bowdooyinkiisa iyo Jilbihiisa, wuxuuna oran:

(رَبِّ اغْفِرْ لِي وَارْحَمْنِي وَاهْدِنِي وَارْزُقْنِي وَعَافِنِي وَاجْبُرْنِي).

(Rabigayoow ii denbi dhaaf, oo ii naxariiso, oo i hanuuni, oo i irsaaq, oo i caafi, oo i kab)[1]. Wuxuuna ku xasilin fadhigaan.

11- Wuxuu Sujuudin Sujuuda labaad isagoo takbiirsanaya, wuuna ku samayn sida tii hore oo kale.

12- Madaxiisa ayuu kor u qaadin isagoo takbiirsanaya, wuxuuna fariisan Fadhi gaaban oo la mida Fadhigii labada Sujuudood u dhexeeyey, waxaana loo yaqaan Fadhiga nasashada, waana sune. Haduu ka tagana dhib ma leh, ku mana jiro dikri iyo duco midna. Ka dibna wuxuu u istaagayaa Rakcada labaad isagoo ku taagsanaya labadiisa Jilib haday u fududaato, hadayse ku adkaato dhulkuu ku taagsan. Ka dibna wuxuu akhrinayaa Faatixada iyo inta u fududaata oo Qur'aanka ah Faatixada ka dib, ka dibna wuxuu samayn siduu ku sameeyey Rakcadii koowaad.

13- Haday Salaadu tahay laba Rakcadood sida Salaada Fajarka, Jimcaha iyo Ciidaha, Qofku wuxuu

[1] Tirmidi ayaa ku wariyey, tirada (284) iyo Abu Daa`uud, tirada (850) iyo Ibnu Maajah, tirada (898).

fariisan markuu ka soo kaco Sujuuda labaad, isagoo qotominaya Lugtiisa Midig, oo goglaya Lugtiisa Bidix. Gacantiisa Midig wuxuu saarayaa Bowdadiisa Midig, isagoo isku laabaya Farahiisa oo dhan marka laga reebo Murugsatada oo uu ku tilmaamayo Tawxiidka. Haduu isku qabto Faryareyda iyo farta ka horaysa ee Gacantiisa Midig, oo uu isku keeno Suulkiisa iyo Far dhexadiisa, lagu tilmaamo Murugsatada sidoo kale waa wanaagsan tahay; waayo labada sifo-ba way ka sugnaadeen Nebiga ﷺ. Waxaana fiican inuu marba mid sameeyo. Gacantiisa Bidixna wuxuu saarayaa Bowdadiisa Bidix iyo Jilibkiisa. ka dibna wuxuu fadhiga ku akhrin Ataxyaadka, waana kan:

(التَّحِيَّاتُ للهِ وَالصَّلَوَاتُ وَالطَّيِّبَاتُ، السَّلَامُ عَلَيْكَ أَيُّهَا النَّبِيُّ ورَحْمَةُ اللهِ وَبَرَكَاتُهُ، السَّلَامُ عَلَيْنَا وعلَى عِبَادِ الله الصَّالِحِينَ، أَشْهَدُ أَنْ لَا إِلَهَ إِلَّا الله وأَشْهَدُ أَنَّ مُحَمَّدًا عَبْدُهُ ورَسولُهُ).

(Atixiyaatu lillaahi wasalawaatu wadayibaatu, Asalaamu calayka ayuha Nabiyu wa Raxmatu Allaahi wa Barakaatuhu, Asalaamu calaynaa wa calaa cibaadi Allaahi asaalixiin, Ash-hadu an laa Ilaaha ilaa Allaah wa Ash-hadu ana Maxamed cabduhuu wa Rasuuluhu), Ka dib wuxuu oran yiri:

(اللَّهُمَّ صَلِّ علَى مُحَمَّدٍ وعلَى آلِ مُحَمَّدٍ، كما صَلَّيْتَ علَى إبْرَاهِيمَ وعلَى آلِ إبْرَاهِيمَ؛

إِنَّكَ حَمِيدٌ مَجِيدٌ، وَبَارِكْ عَلَى مُحَمَّدٍ وعلَى آلِ مُحَمَّدٍ، كما بَارَكْتَ علَى إبْرَاهِيمَ وعلَى آلِ إبْرَاهِيمَ؛ إنَّكَ حَمِيدٌ مَجِيدٌ).

(Allaahuma sali calaa Maxamedin wa calaa aali Maxamed, kamaa salayta calaa Ibraahiim wa calaa aali Ibraahiim; inaka Xamiidun Majiid. Wa baarik calaa Maxamedin wa calaa aali Maxamed, kamaa baarakta calaa Ibraahiim wa calaa aali Ibraahiim; inaka Xamiidun Majiid). Oo macneheedu yahay: (Allow ku salli Maxamed, iyo reer Maxamed, sidaad ugu salliday Ibraahiim, iyo reer Ibraahiim; Adigaa Mahad Badan oo Sharaf Badane. Oo barakee Maxamed, iyo reer Maxamed, sidaad u barakeysay Ibraahiim, iyo reer Ibraahiim; Adigaa Mahad Badan oo Sharaf Badane)[1].

Wuxuun Ilaahay ka magan gelayaa afar, wuxuuna oran:

(اللَّهُمَّ إنِّي أَعُوذُ بِكَ مِن عَذَابِ جَهَنَّمَ، وَمِنْ عَذَابِ القَبْرِ، وَمِنْ فِتْنَةِ المَحْيَا وَالْمَمَاتِ، وَمِنْ شَرِّ فِتْنَةِ المَسِيحِ الدَّجَّالِ).

(Allahayoow waxaan kaa magan galayaa cadaabta Jahanama, iyo cadaabta Qabriga, iyo fitnada Nolosha iyo Dhimashada, iyo sharka fitnada Masiixu Dajaal) [2].

Ka dib wuxuu ku ducaysanayaa wuxuu doono oo khayrka Aduunka iyo Aakhiro ah, dhibna ma leh inuu

---

1 Bukhaari ayaa ku wariyey, tirada (797) iyo Muslim, tirada (402).

2 Bukhaari ayaa ku wariyey, tirada (1311), iyo Muslim, tirada (588).

u duceeyo Waalidki ama Muslimiinta kale, waa isku mid in Salaadu tahay mid faral ah ama sune ah; taasoo salka ku haysa hadalkii guud ee Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, ee ku yimid Xadiiskii Ibnu Mascuud Allaha ka raali noqdee markuu barayey Ataxyaadka:

(ثُمَّ لِيَتَخَيَّرْ مِنَ الدُّعَاءِ بَعْدُ أَعْجَبَهُ إِلَيْهِ فَيَدْعُو).

Ka dib ha doorto ducada uu jecel yahay, ka dibna ha ku duceysto.[1] Oraah kale ayaa ahayd:

(ثُمَّ لِيَخْتَرْ مِنَ الْمَسْأَلَةِ مَا شَاءَ) .

(Ka dib ha ka doorto Ducada tii uu rabo).[2]

Tani waxay wada koobaysaa waxa Adoonka anfacaya Aduunka iyo Aakhiroba. Ka dibna wuxuu u salaama naqsan xaga Midigtiisa iyo bidixdiisa isagoo oranaya: "Asalaamu caleykum wa Raxmatu Allaah, Asalaamu caleykum wa Raxmatu Allaah."

14- Hadii Salaadu tahay seddex Rakcadood sida Maqribka, ama afar Rakcadood sida Duhurka, Casarka iyo Cishaha, wuxuu akhrinayaa Ataxyaadka horay loo soo sheegay isagoo ku salinaya Nabiga nabadgelyo iyo naxariis allaha siiyee, ka dibna wuu kacayaa isagoo ku

[1] Nasaa`i ayaa ku wariyey, tirada (1298).

[2] Muslim ayaa ku wariyey, tirada (402).

taagsanaya Jilbihiisa, Gacmihiisana kor u qaadaya ilaa meel la siman Garbihiisa ama Dhegihiisa, isagoo oranaya: Allaahu Akbar. Wuxuuna saarayaa Gacmihiisa Laabtiisa sidii aan horay u soo sheegnay, wuxuuna akhrinayaa Faatixada oo kaliya. Haduu Rakcada seddexaad iyo tan afraad ee Duhurka ku daro wax ka badan Faatixada mararka qaarkood dhib ma leh; waayo waxaa jira wax arintaas cadeynaya oo ka sugnaaday Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, sida ku cad Xadiiskii Abuu Saciid Allaha ka raali noqdee. Haduu ka tago Saliga Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, Ataxyaadka hore ka dibna dhib ma leh; maxaa yeelay waa Sune ee waajib maaha Ataxyaadka hore. Ka dib wuu Ataxyaadsan Rakcada seddexaad ee Maqribka ka dib, iyo tan afraad ee Duhurka, Casarka iyo Cishaha ka dib, sidaan ku soo sheegnay Salaadii labada Rakco ahayd. ka dibna Midig iyo Bidix ayuu u salaama naqsan, Ilaahayna wuxuu weydiisan dambi dhaaf seddex jeer, ka dibna wuxuu oran:

(اللَّهُمَّ أَنْتَ السَّلَامُ وَمِنْكَ السَّلَامُ، تَبَارَكْتَ يا ذَا الجَلَالِ وَالإِكْرَامِ).

(Allahayow Adigaa nabad ah, xagaaga ayey ka timid nabadu, waad barako badan tahay, Weynaan iyo

Maamuusna Adigaa leh)[1]. ka hor inta aanu dadka u soo jeensan haduu Imaam yahay, ka dibna wuxuu oran:

(لا إلَهَ إلَّا اللهُ وحْدَهُ لا شَرِيكَ لَه، لَهُ المُلْكُ، ولَهُ الحَمْدُ، وَهوَ عَلَى كُلِّ شيءٍ قَدِيرٌ، لَا حَوْلَ وَلَا قُوَّةَ إلَّا بالله، اللَّهُمَّ لَا مَانِعَ لِمَا أعْطَيْتَ، ولَا مُعْطِيَ لِمَا مَنَعْتَ، وَلَا يَنْفَعُ ذَا الجَدِّ مِنْكَ الجَدُّ، لَا إلَهَ إلَّا اللهُ، وَلَا نَعْبُدُ إلَّا إيَّاهُ، لَهُ النِّعْمَةُ وَلَهُ الفَضْلُ، وَلَهُ الثَّنَاءُ الحَسَنُ، لَا إلَهَ إلَّا اللهُ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ وَلَو كَرِهَ الكَافِرُونَ).

Ma jiro Ilaah xaq lagu caabudo Ilaahay keligi mooyee, Ilaahay ma laha cid wax la wadaagta, wuxuu leeyahay Boqortooyada runta ah iyo Amaan iyo mahad idilkeed, wax walbana wuu karaa, ma jirto xeelad iyo awood Ilaahay kaalmadiisa mooyee, Allahayow lama diidi karo waxaad bixisay, lamana bixin karo waxaad diidey, waxna ku ma tarto kan hantida lihi hantidiisu agtaada, ma jiro Ilaah xaq lagu caabudo Ilaahay mooyee, mana caabudayno isaga mooyee, waxaa u sugan nimcda, fadliga iyo amaanta fiican, Ilaah xaq lagu caabudo ma jiro Ilaahay mooyee, anagoo u gaar yeeleyna Ilaahay Diinta, haba diideen oo ha dhibsadeen Gaaladuye.[2]

Wuxuu Ilaahay u tasbiixsanayaa 33 jeer, kuna xamdinayaa intaas oo kale, kuna takbiirsanayaa intaas oo kale, wuxuuna boqolka ku dhamaystirayaa: laa Ilaaha ilaa Allaah waxdahuu laa shariika lahu, lahul-

---

[1] Muslim ayaa ku wariyey, tirada: (591).

[2] Muslim ayaa ku wariyey, tirada: (402)

mulku walahul-xamdu wahuwa calaa kulli shay'in qadiir, wuxuuna akhrinayaa Aayad Kursiga, iyo Qul Huwa Allaahu Axad, iyo Qul Acuudu birabil Falaq, iyo Qul Acuudu birabin Naas Salaad kasta gadaasheed, waxaana Sune ah in lagu celceliyo seddexdan Suuradood seddex jeer Salaada Fajarka  iyo Salaada Maqribka ka dib; waayo waxaa ku soo arooray Axaadiista Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ee sugan, dhamaan Adkaartan waa Sune, ee ma ahan waajib.

Waxaa loo jideeyey Muslim kasta oo Rag iyo Dumar ah inuu tukado afar Rakcadood oo Salaada Duhurka ka horeeya iyo labo ka danbeeya, labo Rakcadood oo Salaada Maqrib ka danbeeya, labo Rakcadood oo Salaada Cishaha ka danbeeya, iyo labo Rakcadood oo Salaada Fajarka ka horeeya, wadartoodu waa laba iyo toban Rakco, Rakcadahaana waxaa la yiraahdaa Rawaatib; maxaa yeelay Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuu ilaalin jiray markuu degan yahay. Marka uu safar ku jiro wuu ka tagi jiray, Salaadaha Raatibada ah, marka laga reebo Sunada Fajarka iyo Witirka, maxaa yeelay Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ilaalin jiray labadoodaba haduu nagi yahay iyo haduu safar

yahayba. Waxaa fadli badan in Salaadahan Raatibada ah iyo Witirka lagu tukado Guriga, hadiise lagu tukado Masaajidka dhib ah ma leh; waana hadalkii Nebiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee:

(أفْضَلُ صَلَاةِ المَرْءِ فِي بَيْتِهِ، إِلَّا الصَّلَاةَ المَكْتُوبَةَ).

(Salaada uu Qofku Gurigiisa ku tukado ayaa ugu fadli badan, marka laga reebo Salaadaha waajibka ah)[1].

Ilaalinta Rakcadahaan waxay ka mid tahay asbaabta lagu galo Janada, waayo Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri:

(مَنْ صَلَّى اثْنَتَيْ عَشْرَةَ رَكْعَةً فِي يَومٍ وَلَيْلَةٍ، بُنِيَ لَه بِهِنَّ بَيْتٌ فِي الجَنَّةِ).

(Qofkii tukada labo iyo toban Rakcadood Maalintii iyo habeenkii, Janada waxaa looga dhisaa Guri )[2].

Haduu tukado afar Rakcadood oo Casarka ka horeeya, iyo labo Rakcadood oo Maqribka ka horeeya, iyo labo Rakcadood oo Cishaha ka horeeya waa wanaagsan tahay; maxaa yeelay waxaa Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ka sugnaatay wax arintaas tilmaamaya, sidoo kalena haduu tukado afar Rakcadood oo Duhurka ka dambeeya iyo afar ka horeeyaba waa wanaagsan tahay; waayo Nabigu

[1] Bukhaari ayaa ku wariyey (6860).
[2] Muslim ayaa ku wariyey, tirada (728).

nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri:

(مَنْ حَافَظَ عَلَى أَرْبَعِ رَكَعَاتٍ قَبْلَ الظُّهْرِ، وَأَرْبَعٍ بَعْدَهَا حَرَّمَهُ اللَّهُ عَلَى النَّارِ).

(Qofkii ilaaliya afarta Rakcadood ee Duhurka ka horeeya iyo afar ka dambaysa Ilaahay Naartuu ka xarimaa)[1]. Macnuhu waa inuu Sunada Raatibada ah ku darayo labo Rakcadood oo Duhurka ka danbeeya; maxaa yeelay Sunada Raatibada ahi waa afar Rakco oo ka horeeya iyo labo ka danbaysa. Markuu ku daro labo kale oo ka danbeeya wuxuu helayaa wixii lagu sheegay xadiiska Umu Xabiiba Allaha ka raali noqdee.

Waafajintana Ilaahay ayaa leh, naxariis iyo nabadgelyo Allaha siiyo Nabigeena Maxamed Binu Cabdullahi iyo Ehelkiisii iyo Asxaabtiisii iyo intii ku raacday wanaag ilaa Maalinta Qiyaame.

❊❊❊

so395v2.1 - 31/07/2026

1 Axmed ayaa ku wariyey, tirada (25547), iyo Tirmidi, tirada (393), iyo Abuu Daa`uud, tirada (1077).

رئاسة الشؤون الدينية بالمسجد الحرام والمسجد النبوي

# رسالة الحرمين

# Message of The Two Holy Mosques

Guidance content for the visitors of the Holy Mosque and the Prophet's Mosque in languages.